

## TABABARADA & FASALADA

**Qeybta ilaha Xanaanada Caruurta waxay bixiyaan dhowr nooc oo tabarada Xanaanada Caruurta.**

[Fiiri Jadwalka Tababarada CCR](#)

### **Washington Stars (Tababarka Gobolka iyo Habka Diiwaangelinta)**

Diiwaangelinta & Tababarada Gobolka Washington (STARS) waa shaqo habka horumarin iyo tababarida shaqsiyaadka ka shaqeeya xanaanada caruurta, waxbarashada hore, xanaanada da'da iskuulka.

Bixiyayaasha xanaanada caruurta ee lisenka leh ee gobolkan Washington waxa laga doonayaa inay qaataan 20 saacadood oo tababar caadi ah iyo 10 saacadood oo waxbarasha sii wadida tababarka sanadlaha. 20 saacadood ee tababarka salka waxa laga qaadan karaa tababre ay ogolaatay Washington STARS, urur ama kuleejka bulshada. Sharuucdani waxay quseeyaan dhamaanba bixiyayaasha xanaanada caruurta ee qoyska, superfeysarada da'da iskuulka, isku duwayaasha xanaanada da'da iskuulka, superviosorada baraaamijyada iyo madaxda shaqaalaha. Tababarka ilaha xanaanada caruurta waxa uu ku qoran yahay jadwalkiisu joornaalka sedexdii billodba marka soo baxa.

### **Talaabada 1aad ee STARS**

Waraqda warbixinta ayaa qasaba in loo soo diro Washington STARS 7 casho gudahood markii tababarka la bilaabo ama la shaqaaleeyo shaqaalaha xanaanada caruurta.

### **Talaabada 2aad ee STARS: Tababarka 20-ka Saacadooda**

Tababarkani waxa qasaba in lagu dhamaystiro lix bilood gudahooda markii lisenka lagu siiyo ama la shaqaaleeyo. Waxyaabaha ku yaal koorsada tababarka 20-saacadooda waxa uu ku saleysan yahay buuga talooyinka gobolka. *Adult Sized Guide to Child Sized Environments* Midkaasoo ah waxyaabaha looga baahan yahay Lisenka Gobolka Washington. 20-ka saacadood galaasyada ahi waxa loo qorsheeyay in la kala qaato dhowr mar. Macalimiintii hore uga soo shaqeeyn jirtay xanaanada caruurta iyo waxbarida hore ama xanaanada da'da iskuulka waxay codsan karaan in laga dhaafto waxbarashada STARS iyagoo soo buuxinaya waraqda warbixinta Bixiyaha iyo soo diraya waraqaha dukumintiga ah ee la iska doonayo. Haddii bixiyuhuu uu haysto ka dhaafida waxbarashada. Waa laga dhaafayaa tababarka 20-ka saacadoodka ah. Sido kale Lisenka qofka bixinaya ayaa ka dhaafi kara isagoo fiirinaya waaya aragnimada.

[Fiiri Jadwalka Tababarka 20-ka saacadood ee CCR](#)

Wixii warar ah ee doorashada internet-ka ama Video ah (Vidiowgu waxa uu diyaar u yahay oo kaliya Xanaanada Caruurta ee Qoyska) ee 20-saacadood Tababarka STARS, kala xariir Kris Lowe [lowe@childcare.org](mailto:lowe@childcare.org)

### **Talaabada 3aad ee STARS: 10-saacadood oo sii wadida waxbarashada**

Sanad kasta dadka bixiyayaasha ahi waxa laga doonayaa inay dhamaystaan 10-saacadood oo sii wadida waxbarasada. Galaasyadani waa inay ku salaysnadan Waxbarashada degaanka salka ee Gobolka Washington. Madaxda Xaruumaha, ama Superviosorka Barnaamijka, shan ama tobón saacadood waa inay ka bartaan dhinaca maamulka. Galaasyadan waxa loo qorsheeyay in la kala qaato dhowr mar, oo ay eegayaan dhowr meelood.

[Fiiri jadwalka tababarka 10-ka saacadood ee CCR](#)

## **Ururada loo ogolaaday Tababarada iyo Tababarayaasha**

Tababarka Washington STARS waxa laga qaadan karaa Tababarayaasha ay ogolaadeen Washington STARS ama ururada. Bixiyayaashu waxay kaloo qaadan karaan fasalada kuleejooyinka aysan STARS ogolaan laakiin waxbarashadaasu waxaa loo xisaabayaa u isticmaalida sii wadida waxbarashada. Kala xariir arintaan STARS midan, ama wixii kalaba.

Ilaha Xanaanada Caruurta waa tababar ay ogolaatay STARS. Kuleejooyinka bulshada iyo teknoolijiyada iyagana waa la ogol yahay. Kala xariir wararka dhan ee Tababarada iyo tababarayaasha ay STARS ogolaatay, la xariir STARS:

WAEYC - Washington Association for the Education of Young Children  
(253) 854-2565x17  
(800) 727-3107x17

## **Fiiri Sido Kale**

Waxbarashada Dheer  
Qaarshka iyo Scholarshipka  
First Aid, CPR iyo HIV tababarada  
Shirarka Bulshada